Somali

Aniga waxaan ahay Kormeeraha Guud Denise Juneau. Isbedal deg deg ah oo aad u socdo labadii sitimaan ee la soo dhaafay, Waxaan rabaa inaan qaato qeyb labaad si aan uga fikiro waxa ay bulshadeena ku soo gabagabeeysay waqti gaaban I want to take aaccomplished uun madaama dugsiyada oo dhan laga xiray gobolka iyadoo laga jawaabayo COVID-

Waxaan ku dhiirigeliyay ficilada naxariista ee yar yare e laga arko dhamaan magaaladeena xiliyadan aan sugnayn, Waan ku hanweynahay in aan xubin ka noqdo bulshadeena maadaama aan DHAMAAN u kacno inaan is taageerno midba mida kale. Iyo Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa ka go`an in ay qeyb ka qaadato sidii ay ugu jawaabi laheyd bulshadeena . tani waxaa ka mid ah shaqaalaheena adeega nafaqada oo horey u siiya ardayda in kabadan 12,000 oo raashin ah ardayda iyo qoysaska.

In kastoo aan la kulano caqabado dib u dhacyo u hogaansanaanta oo ay tahay in aan wax ka bedelno qoshaheena anagu , Waxaan ka shaqeyneynaa inaan taageerno kuwa safka hore kaga jira anagoo bilaabeyna xarumaha daryeelka caruurta jawaabeysana ugu hreyntii, shaqaalaha daryeelka caafimaadka, iyo qoysaska oo aad uga dheereeyo cadaalada waxbarashada. Mar alla markii aan ka soo baxno dhulkaas yar , waxaan ku dari doonaa shuraako badan si aan u fidino adeegan muhiimka ah.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle ayaa ah meesha ugu horeysa dugsiyada waxbarashada macalimiinteena iyo shaqaalaha degmadu waxay qabteen shaqo cajiib ah iyagoo bixiya xalka hal abuurka ah ee dhibaatada aan hore loo arag barayaashayada ayaa ka mid ah kuwa ugu wanaagsan dalka. Waxay ogyihiin inay tahay waqtiyada sidan oo kale ah in ardaydoodu aad ugu baahan yihiin . waqtigaan la joogo, waxaan ka codsanay macalimiintayada inay sii wadaan taageerada iyo inay la xiriiraan ardayda ugu yaraan laba jeer sitimaankii wixii ku saabsan shaqada y ka qaban karaan guriga. . haday u sabab tahay, adigoo aadan ka maqlin macalinka ilmahaagu fadlan la xiriir maamulaha dugsigaaga. Waxaan sameyneynaa barnaamij waxbarasho oo aad u xoog badan, waana la soo xiriiri doonaa markii uu diyaar yahay.

Waana ognahay in tani ay tahay waqti aan horay loo arag oo ay jiraan su`aalo badan oo ku saabsan fasalka , dhibcaha , iyo aqoonta waxbarasho . Waxyaabo badan waan ka fikireynaa sidii aan wax u qaban laheyn xagga xirnaashaha dugsiga oo sii soconaayo. Dhibaatadaan waxaa nala gudboon in aad si wax ka duwan sidii hore wax u qabanp pp barayaasheena waxay ku soo kordhayaan caqabada. Waxaan ka mahadcelinayaa dulqaadkaaga iyo fahamkaaga sida aan ugu shaqeyno inaan taageerno baahiyaha soo kordhaya ee bulshadeena iyo ardayda oo aan u wada wadno biyahaan aan wada xirney.

Si loo kabo waxqabadka ka imanaya maclimiinta shaqsiga ah, degmadu waxay ku bixineysaa barnaamijka SPS TV ee channel 26, baraha bulshada, iyo websaydhka oo bilaabanaya maanta . Fiidiyowyadan gaagaaban waxay miijinayaan barayaasha Dugsiyada Dadweynaha Seattle ee taageera barashada maadooyin kala duwan iyo heerar fasal. Waxaan sidoo kale ku bixinaynaa agab waxbaarasho oo daabacan goobaha cuntada lagu qaybiyo dugsiga kuwa aan heli Karin kombuyuutar, TV, ama internet . Mid ka mid ah kooxdeena naxliga leh ayaa soo ururiyay, daabacday oo u qaybisay 6,500 arday geysayna goobaha cuntada . kheyraadkan waxaa ka heli kartaa websaydhkeena.

Waxaan fahansanahay inay jiraan shaki badan iyo walwal badn oo ku saabsan saameynta xiritaankan daba dheeraaday uuku yeelan doono ardaydeena, gaar ahaan waayeelkayada todobaadkii hore, aya gudoomiyaha Inslee wuxuu saxeexay sharci kaas oo ay ka mid yihiin waxyaabo kale oo keenaya in laga cafiyo ardayda qalinjabineysa 2020. Waxaan la shaqeyneynaa la-taliyayaasha dugsiga, maamulayaasha, iyo kuwa kale si aan go`aan uga gaarno sida aan taas u dhaqan gelin karno oo ay tahay inaan dhowaan

Somali

hagno kana helo hay`ada waxbarashada gobolka. Waxaa sii dheer , Gudiga Waxbarashada Gobolka .waxay qorayaan qawaaniin ka dhaafitaanada kuwaasoo ay qorsheynayaan inay spp gabagabeeyaan dhamaadka April. Waan kula wadaagi doonaa wixii akhbaar oo cusub isla markii aan helno waan kula soo wadaagi doonaa.

Markii aan ka fekerayo wixii ay bulshadeena iyo degmadeenu ku talaabsadeen todobaadyadii la soo dhaafay, aad Ayaan ugu mahadcelinayaa shaqada adag iyo u hibeynta shaqaalaheena cajiibka ah ee daryeela, halabuurnimo, iyo iswaafaqsan qaabka ay u taageeraan.

ardayda iyo qoysaska, isla markaana waan u hanweynahay inaan garab shaqeeyo Ardayda iyo qoysaskeena, waad ku mahadsantahay inaad nala shaqeyso intii lagu jiray kala guurka, Waxaan ka shaqeyneynaa inaan helno wax cusub oo caadi ah , xitaa iyadoo ay arimuhu isbedelayaan, Waad ku mahadsantahay wadaagida walaacyadaada, inaad nala xisaabtantaa, iyo qaar badan oo idinka mid ah oo gaadhay inaad muujiso taageeradaada waqtigan adag.

Shaqadani way ka dhamaatay, lakiin waxaan ku dhiirigelinayaa geesinimadaiyo naxariis ee ay bulshadeenu horey u muujisay. Markale waad ku mahadsantihiin shaqaalaheena, ardayda iyo qoysaska oo wada shaqeynaya.